



IMMIGRANT LEGAL ADVOCACY PROJECT

WARAR jadiid ah oo ku aaddan dadka haysta TPSka safarka iyo U-qalmitaanka Kaararka Cagaaran (Green Cards)

Idi Bishii Luulyo 2022ka, Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka Mareykanka (USCIS, United States Citizenship and Immigration Services) ayaa ku dhawaaqay siyaasad cusub oo ku saabsan safarka iyo u-qalmitaanka kaararka cagaaran ee dadka haysta Xaaladda Ilaalinta Ku Meel Gaarka ah (TPS, Temporary Protected Status).

Haddii aad TPS haysatiid, waxa aad u baahan tahay inaad ogaato:

- TPS lafteedu maaha dariiq lagu helo kaarka cagaaran gudaha Mareykanka, (sidoo kale loo yaqaan hagaajinta xaalada) ama dariiqa loo marayo dhalashada Mareykanka
- Si ay u codsadaan kaarka cagaaran inta ay ku sugan yihin Mareykanka, dadka haysta TPS iyo dadka kale waa inay:
 1. U qalman fiisaha muhaajiriinta (tusaale ahaan, iyada oo loo marayo muwaadin Maraykan ah ama xubin qoys oo deganaansho rasmi ah oo sharci ah haysta);
 2. **Si sharci ah u soo galan Mareykanka ka dib markii "la baaro oo la ogolaado";** iyo
 3. Aan la diidin sababo kale dartood.
- Dadka haysta TPS ee soo galay Mareykanka sharci la'aan "lama baarayo oo lamana ogolaanayo," taaso oo ah shardi lagu helo dalbashada kaarka cagaaran. Laakiin hadda, dadka haysta TPS waxay haystaan hab lagu "baaro oo lagu ogolaado" marka ay u socdaalayaan meel ka baxsan Mareykanka iyago haysta ogolaanshaha USCIS oo ay dib ugu soo galaan dalka.

Tallaabooyinka xiga ee ku aaddan dadka haysta TPS hadda:

- Ogaysiiskan macnihiisu **MAAHA** in dhammaan dadka haysta TPS ee socdaala dibna u soo gala Mareykanka ay awood u yeelan doonaan inay codsadaan kaarka cagaaran. Waxay la macno tahay in dadka haysta TPS ee u qalma fiisaha muhaajiriinta (tusaale ahaan iyada oo loo marayo xubin qoys), laakiin aan haysan gelitaanka lagama maarmaanka ah ee sharciga ah ee Mareykanka si ay u codsadaan kaarka cagaaran, laga yaabo inay hadda awoodaan gelitaankaas sharciga ah.
- Haddii aad aaminsan tahay inaad ka faa'iidaystaan karto siyaasaddan cusub ee dadka haysta TPS, la hadal qareen socdaalka ah ama wakiil la aqoonsan yahay.
- Tusaalooyinka dadka haysta TPS ee laga yaabo inay ka faa'iidaystaan siyaasaddan cusub waxaa ka mid ah:
 - Qof haysta TPS oo guursaday muwaadin Mareykan ah ama degane rasmi ah oo sharci ah.
 - Qof haysta TPS oo ah waalidka ilmo Mareykan ah oo da'diisu tahay 21 ama ka weyn tahay.
 - Qof haysta TPS oo ka yar 21 jir, aan guursan, iyo ilmaha muwaadin Mareykan ah.
- FIIRO GAAR AH: Ha **KA** codsan USCIS inaad u safarto meel ka baxsan Mareykanka adoon la hadlin qareenka socdaalka ama wakiil la aqoonsan yahay. Waa inaad fahantaa wax kasta oo saameeya u-qalmitaankaaga inaad ka baxdo Mareykanka oo aad dib u soo gasho. Waxaa laga yaabaa inay jiraan khataro ay tahay inaad ogaato ka hor intaadan ka bixin Mareykanka, U.S.

Ka digtoonow khiyaanada: Hubi inaad kala hadasho wixi ku aaddan fursadaha aad haysato qareen socdaal oo aqoon leh ama wakiil la aqoonsan yahay. Iska jir dadka isku daya inay khiyaameeyaan soo galootiga lacagtooda iyagoo iska dhigaya inay ka caawin karaan kiisaska socdaalka.